IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

## JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 30 Luulyo 1981 L. 3R7

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريده شهريه

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D S

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka var waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

KOOBNIIN

QOYBTA KOWAAD

SHARCI

QAYBTA LABAAD

W.M.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 36 ee 16 Maajo 1981, Wax ka beddelid Xeerka Madaxweynaha 21 Jen. 1963, Lam. 14 ku saabsan Ujuuradaha Bixinta Sumadaha Baabuurta. Bog. 1140

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 37 ee 16 Maajo 1981, Wax ka beddelid Ujuuradaha Maxkamadaha ee Madaniga » 1142

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 38 ee 16 Maajo 1981, Khidmadda Ujuuradda Iidhehyada lagu qoro Wargeysyada. » 1145

WAKAALADDA M. QARANKA

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 39 ee 16 Maajo 1981, Wax ka beddelid Xeerka Lam. 6 ee 9 Jen. 1967, ku saabsan qiimaha oo dadka Dhulalka Damanyaale looga siiyo. » 1147

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 40 ee 16 Maajo 1981, Wax ka beddelid Xeer Wasiirka Is/ta iyo Gadiidka ee 5.2.1966 Lam. 36. » 1148

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 41 ee 16 Maajo 1981, Wax ku kordhin Tacriifada Teleefoonada. » 1157

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 42 ee 16 Maajo 1981, Wax ka beddelid Tacariifada Ujuuradaha Nootaayayaasha ee ku Lifaaqan Xeerka Gud/ha G. Sare ee Kacaanka ee 3 Abriile 1972, Lr.66 » 1160

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 43 ee 16 Jun. 1981, Magacaabid Gudd/ha Maxkamadda B. ee Gobolka W/Galbeed Hargeysa. » 1163

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 44 ee 30 Jun. 1981, Kordhin Qiimaha Sigaarka Galayr iyo Tarraqa. » 1164

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.36 ee 16 Maajo 1981
Wax ka beddelid Xeerka Madaxweynaha 21 Jannaayo 1963, Lam.14 ku saabsan Ujuuradaha Bixinta Summadaha Baabuurta, Rimoorkiyada iyo Dhucdhuclayaasha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 84, Lamb. 14 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Madaxweynaha 21 Jannaayo 1963, lamb. 14 ku saabsan Ujuuradaha bixinta Summadaha Baabuurta, Rimoorkiyada iyo Dhucdhuclayaasha;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay laga maarmaan tahay in la kordhiyo ujuuradaha bixnta summadaha kor ku sheegan, si qiimahooda lagu xaqiijiyo Kharajka ku baxayaa samaynta isla summadahaas;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada ay soo jeediyeen Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, iyo Wasiirka Maaliyadda;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Qod. 2 ee Xeerka Madaxweynaha 21 Jannaayo 1963, lamb. 14 waxaa loo beddelay sida soo socoa:-
QOD. 2aad

Ujuuradaha summadaha oo Xafiiska Baabuurta Rayidka (P.R.A.) uu bixinayo, ha noqdaan kuwa cusub, ama kuwa la beddelayo ama la cusboonaysiinayo, Waa kuwa hoos ku kala tifaftiran:—

a) Sumadaha baabuurta oo idil, midka hore iyo midka gadaal lagu dhejinayo, oo isugu jira . . . . . . . . . waa Sh. So. 250/=
hal keliya ah . . . . . waa Sh. So. 120/=
b) Sumadda Rimoorkiyada, oo
t) Sumadda Dhucdhuclayaasha iyo wixii la mid ah.. .. waa Sh. So. 80/=

Qod. 2aad

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 16 Maajo 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W. MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

WAS. W. GAADIIDKA C. IYO DH.

(Cumar Maxamed Xandulle)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay.

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 64.
Muqdisho, 4 Luulyo 1981.

Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 37 ee 16 Maajo 1981wax ka Beddelid Ujuuradaha Maxkamadaha ee Madaniga

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. Lr.14 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 14 Nofembar 1973, lamb. 109;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay ahay lagama maarmaan in wax laga beddelo ujuuradaha Maxkamadaha Madaniga ah;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada ay soo jeediyeen Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Noqdadaha 1 iyo 2 ee warqad tilmaameedka raacsan Xeerka Madaxweynaha 14 Nofembar 1973, Lr. 109, ku saabsan ujuurada Maxkamadaha, waxaa loo beddelay sida soo socota:-

1. Dacwo kasta ee madani ah oo Maxkamadaha hortooda lagu furo, waxaa laga qaadayaa ujuuradaha hoos ku kala tilmaaman:-

a) Haddii dacwadu ay ku saabsan tahay lacag ama wax kale oo lacag lagu qiimeyn karo 10% ee qiimaha lacagta ama qiimaha xuquuqda lagu dacwoonayo;
b) Haddii dacwaddu ay ku saabsan tahay wax ama xuquuq oo aan lacag lagu qiimayn karin Sh. So. 150/=.

2. Ujuuradahaas waxaa la bixinayaa hal mar keliya, waxayna koobaysaa saddexda darejadood ee Maxkamadaha oo isugu jira; waxaana laga qaadayaa dacwoodaha.

Qod. 2aad

Wax alla wixii amar ah oo horey loogu dhaqmi jirey, lidna ku ah ama aan waafaqsanayn Xeerkan waa la baabi'iyey.

Qod. 3aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa maalina lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.
Muqdisho, 16 Maajo 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W. MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

WASIIRKA W. GAR. & Ar. DIINTA

(Axmed Shire Maxamuud)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay.
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 59.
Muqdisho, 4 Luulyo 1981.

Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 38 ee 16 Maajo 1981 Khibradda Ujuuradda Ildheriyadda lagu qoro Wargeysyadda Dawladda ama laga sii daayo Raadiyaha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82 Lr. 14 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Maamulka Guud ee Dawladda iyo beddelaaddii ka dambeysey;

Isagoo Aqoonsaday: In ay tahay lagama maar maan in la xaddido Cawinaadda Iidhahyada lagu qoro Wargeysyada Dawladda ama laga siidaayoRaa-yooga.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada isaga ay u soo jeediyaan Wasiirka Warfaafinta iyo Hanuuninta Dad-weynaha iyo tan Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

A. Ujuuradda Iidhehyada ee laga sii daayo Raa-diyaha waxaa laga dhigay sida soo socota:-

a) Ogeysiiska loo sii daayo Shirkadaha, Wakaa-ladaha iyo Mashaariicda waxaa looga qaa-dayaa halkii mar ee loo baahiyo Shs. 500/=;

b) Riwaayadaha, Caweysyada iyo Shineemoo-yinka hilkii mar ee loo baahiyo waxaa looga qaadayaa Shs. 200/=;

t) Ogeysiiska iyo Iidhehyada loo sii daayo Dad-weynaha halkii mar waa Shs. 60/=.

B. Ujuuradda Iidhehyada lagu qorayo Wargeys-yada Dawladda waxaa laga dhigay sida soo socota:-

a) Iidheh iyo Ogeysiiska Wargeyska lagu qoro, halkii (1)cm. waa Shs. 10/=;

b) Bog dhan oo Wargeyska lagu qoro ama Iidheh waa Shs. 2.500/=.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 16.5.1981

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W. MAALIYADDA
(Cabdullaahi Axmed Caddow)

WAS. W. WARFAAFINTA & H. D.
(Dr. Maxamed Aadan Sheekh)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay.
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 60.

Muqdisho, 4 Luulyo 1981.

Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 16 Maajo 1981 wax ka beddelid Xeerka Lamb. 6 ee 9 Jenayo 1967. ku saabsan Qiimaha oo dadka DhulalKa Damanyaale looga siiyo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod.82 lamb.14 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Madaxweynaha ee 9 Jannaayo 1967, Lamb.6;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay lagama maarmaan tahay in waee laga beddelo qiimaha dhulalka Damanyaaliga oo dhismo loo weydiisto;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Hawlaha Guud;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aanka Golaha Wasiirada.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Qod. 1aad ee Xeerka Madaxweynaha ee 9 Jannaayo 1967, lamb.6, ee orarka hore ku tifaftiran, waxaa loo beddelay sida soo socota:-

Qod. 1aad: Qiimaha oo dadka dhulalka damanyaaliga ah looga siiyo i nay dhistaan, waxaa lagu kala xaddiday sida soo socota, iyadoo qiimahaas lagu hagaajiyey meesha dhulka la bixinayo uu ku yaallo, sida ku kala tifaftiran naqshadda oo isla xeerkaan ku lifaaqan:

| | | | |
|---|---|---|---|
| I) | Meesha dhexe (zona centrale), mitirkiiba . . . . . . . . . . | Shs. | 50.00; |
| II) | Meesha dhexe oo ku meelgaar ah (zona centrale) . . . . . . . | » | 30.00; |
| III) | Meesha oo ka hooseysa meesha dhexe (zona sub centrale) . . . | » | 15.00; |
| IV) | Meesha oo ka hooseysa meelaha dhexee ee ku meelgaar ah (zona sub centrale transitoria) . . . | » | 10.00; |

| | | | |
|---|---|---|---|
| V) | Meesha ku taalla magaaladda agagaarkeeda (zona periferica) . . | » | 6.00; |
| VI) | Meesha oo si ku-meel gaar ah ku taalla agagaarka magaaladda (zona periferica) transitoria) . . . | » | 4.00; |
| VII) | Meesha magaaladda ka baxsan (zona esterna) . . . . . . . . . | » | 3.00; |

Qod. 2aad

Xeerkaanu wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.
Muqdisho, 16 M:jo 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA HAWLAHA GUUD
(S/Guuto Maxamuud Nuur Galaal)

Waan agaranay ee Diiwaangelinay.
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 65.
Muqdisho, 4 Luulyo 1981.

Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 40 ee 16 Maajo 1981 wax ku Kordhin Tacriifadda Teleefoonda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82 Lamb. 4, ee Dastuurka Damhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Qod. 9 ee Sharciga 22 Disember 1975, Lamb. 1 ku saabsan Isgaarsiinta;

ISAGOO ARKAY: Xeerka 15 Maajo 1976, Lamb.59, ee Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in wax lagu kordhiyo tacriifadda Teleefoonnada, ku lifaaqan Xeerka 15 Maajo 1976, lamb. 59 ee kor ku sheegan;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada ay soo jeediyeen Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta, iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Qod. L,2,3,4,6,7. iyo 8, ee Tacriifadda Luuli faaqan Xeerka Wasiireed ee 15 Maajo 1976, lamb. 59, waxaana loo beddelay sida soo socota:

Qod. 1aad

*Kharajka gelinta Teleefoonnada ee iswada (telefoni automatici):*

1) Gelinta Teleefoonka ugu horeysa, haddii xarigu, laga bilaabo meesha sanduuqa yaalla ilaa meesha teleefoonka la lagelinayo, dhererkiisu uu gaaro 50 mitir . . .waa Shs. 500/=
Wixii ka dheer 50 mitir, mitirkiiba . . . . . . . . . . waa » 6/=

2 ) Teleefoon guri ama Xafiis yaalla haddii lagu kordhiyo mid kale oo

ay isku lambar yihiin, kan dambe la gelinayo, kharaj gelintiisu . . . waa » 200/=

3) Teleefoon guri ama Xafiis yaalla, haddii lagu kordhiyo mid kale oo aadayo guri ama Xafiis oo dibedda ah, kharash gelinta teleefoonkaas dambe, waxaa lagu qiyaasayaa dhererka xarigiisa intii mitir uu yahay.

4) Kharash gelinta dawanka (bell), furaha (key), iyo ballaga (plug) inuba, markii ay gudaha yihiin . . . . . . . . . . . . waa » 150/=

Qod. 2aad

*Kirada Teleefoonka saddexdii bilood laga qaado:*

1) Teleefon layn ganacsi ah, bishiiba waa Shs. 80/=
2) » » » », haddii laba teleefoon laysku xiro, midka kan hore la siman (parallelo), bishiiba . . . . . . . . . waa » 60/=

3) Teleefoon Guri, bishiiba . . waa » 40/=

4) » », haddii laba teleefoon wadaagto, kan kale, bishii waa » 30/=

5) Teleefoon ganacsi ah, teleefoonkii kordhiyo, ama dibedda ama guha ha u baxo, bishii waa . . . . » 70/=

6) Teleefoon Guri, teleefoonkii lagu kordhiyo, ama dibedda ama gudaha ha u baxo, bishii waa . . . » 30/=

7) Dawanka (bell), furaha (key) iwm. waa . . . . . . . . . . . . . » 45/=

8) Xubinta yaryar ee teleefoonnada (Centralini), kirada laga qaado bishiiba:-

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Xubinta | 150 | layn waa | Shs. | 1.780/= |
| » | 120 | » » | » | 1.600/= |
| » | 100 | » » | » | 1.400/= |
| » | 80 | » » | » | 935/= |
| » | 50 | » » | » | 550/= |
| » | 30 | » » | » | 350/= |
| » | 20 | » » | » | 235/= |
| » | 15 | » » | » | 175/= |
| » | 10 | » » | » | 115/= |
| » | 7 | » » | » | 85/= |
| » | 6 | » » | » | 85/= |
| » | 5 | » » | » | 85/= |
| » | 4 | » » | » | 85/= |
| » | 1 ilaa 2 | » » | » | 70/= |

Qod. 3aad

*(Kharash wecidda gudaha)*

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1) | Wacidda teleefoon ganacsi, halkii mar waa | » | 0,45/= |
| 2) | Wacidda teleefoon guri hal mar waa | » | 0,35/= |
| 3) | Wacidda Teleefoon caamka ah (get-tone) halkii mar waa | » | 0,50/= |
| 4) | Jettone haayaha (gestore) wuxuu xaq u leeyahay in halkii jettone oo gadma laga siiyo | » | 0,10/= |

Qod. 4aad

*(Kharashka beddelaadda):*

1) Haddii teleefoon meeshii hore uu yiil laga beddelo oo meel kale oo dibedda ah la geeyo, qiyaasta labada meelood inta u dhaxaysa haddii aysan ka bad nayn 50 mitir, kharajka beddelaadda waa . . . . . . . . . . . » 250/=

Haddii qiyaastu ay ka badan tahay 50 mitiir, wixii dheeraad ah mitirkiiba waa . . . . . . . . . » 3/=

1) Haddii teleefoon meeshii uu yiilay laga beddelo, oo meel kale ee isla guriga gudahiisa ah lagu xiro, kharajku waa . . . . . . . . » 150/=

3) Magac beddelku waa . . . . . » 120/=

Qod. 5aad

**Teleefoonka gacanta lagu wareejiyo kharajka gelinta**

1) Qiimaha gelinta telefoonka gacanta lagu wareejiyo haddii qiyaaska sanduuqa iyo meesha la gelinayo u dhaxayso, ay ka badnayn 50 mitir waa. . Shs. 200/=

Wixii 50 mitir ka badan mitirkiiba waa . . . . . . . » 3/=

2) Haddii telefoon xafiis ama guri yaal mid kale lagu kordhiyo gelinta dambe waa . . . . . . . » 150/=

3) Telefoon guri ama xafiis yaalla lagu kordhinayo mid kale oo kan kale aadayo guri ama xafiis oo dibedda ah; kharashka gelintiisa kan dambe wuxuu ku xiranyahay hadba qiyaasta dhererka labada meelood u dhaxaysa intuu yahay.

4) Gelinta Dawanka (bell-, furaha (key) iyo bakaaga (plug) waa . . . . . » 100/=

Qod. 6aad

**Kirada telefoonka gacanta lagu wareejiyo bishiiba**

1) Tel. layn gacansi ah bishiiba waa. . . » 120/=

2) Haddii telefoon gacansi ah, mid kale lagu kordhiyo oo isku layn ah (parallelo), kan kale kiradiisu waa . . . » 25/=

3) Telefoon layn guri bishiiba waa. . . » 60/=

4) Haddii telefoon layn guri ah, midkagu kordhiyo oo isku layn ah (parallelo), kan kale kiradiisu waa. . . . » 20/=

5) Telefoon layn gacansi ah haddii ay wadaagtaan laba telefoon ama ka badan, midkiiba waa . . . . . . » 20/=

6) Telefoon layn guri ah, haddii ay wadaagtaan laba teleefoon ama ka badan, midkiiba waa . . . . . . . » 15/=

7) Dawanka (bell), furaha (key) iyo ballaaga (plug) waa . . . . . . » 5/=

Qod. 8aad

*Qiimaha wacidda teleefoonnada dalka gudahiisa*

Qof kasta doonayaa inuu teleefoon u dirsado magaalo ilaa magaalo, dalka gudihiisa, wuxuu bixinayaa qiimaha hoos ku kala qoran; waqtiga uu dirsanayona ugu yaraan waa3 daqiiqadood; inta ka badan 3da daqiiqadood, daqiiqaddii dheeraad ahba wuxuu xibina-1/3 ee qiimaha gud ee saddexda daqiiqadood:-

| Km. ilaa Km. | 3dii daqiiqadood | Daqiiqada dheeraadka ah | Km. ilaa Km. | 3dii daqiiq. | Daqiiqada dheeraadka ah. |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 ilaa 25 | 2,10 | 1,05 | — | — | — |
| 26 » 50 | 3,00 | 1,50 | — | — | — |
| 51 » 75 | 3,60 | 1,80 | — | — | — |
| 76 » 100 | 4,80 | 2,40 | 10 — 100 | 5, — | 1,70 |
| 101 » 150 | 5,70 | 2,85 | 101 — 200 | 8, — | 2,70 |
| 151 » 200 | 6,00 | 3,00 | 201 — 500 | 11, — | 3,70 |
| 201 » 300 | 7,20 | 3,00 | 501 — 800 | 13, 50 | 4,50 |
| 301 » 400 | 8,10 | 3,00 | 801 —1500 | 15, 60 | 5,20 |
| 401 » 500 | 9,00 | 3,00 | 1500 ka badan | 18, — | 6,00 |
| 501 » 600 | 9,90 | 3,00 | — | — | — |
| 601 » 700 | 10,80 | 3,00 | — | — | — |
| 701 » 800 | 11,40 | 3,00 | — | — | — |
| 801 » 900 | 12,40 | 3,00 | — | — | — |
| 901 » 1000 | 12,60 | 3,00 | — | — | — |
| 1000 » 1500 | 13,20 | 3,00 | — | — | — |
| 1500 wixii ka badan | 15,— | 3,00 | — | — | — |

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 16 Maajo 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W. MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

WASIIRKA W. B. & ISGAARSIINTA

(Max'd Xawaadle X.Madar)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay.
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 63.

Muqdisho 4 Luulyo 1981.

Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 41 ee 16 Majo 1981
Wax ka bedelid Xeer Wasiirka Isgaarsiinta iyo Gaadiidka ee 5ta Febaraayo 1966 L. 36 ku saabsan Nidaaminta Ujuuradaha Dayuuradaha Rayadka ah.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod.82, lamb.4 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciga 18ka Agoosto 1970, Lamb.47 oo isaga lagu siinayo awood inuu soo dejiyo Xeer-nidaamiyeyaasha;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay lagama maarmaan tahay in wax laga beddelo Xeerka Wasiirka Wasaaradda Is/siinta iyo Gaadiidka ee 5ta Febraayo 1966, N.36;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada ay soo jeediyeen Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka, iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aanka Golaha Wasiirrada.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Ujuuradaha Dayuuradaha Rayadka ah ku kala xusan qodobbada 4, 7, iyo 9 ee Xeerka Wasiirka Isgaarsiinta iyo Gaadiidka ee 5ta Febraayo 1966, Lamb. 36, oo horey lagu beddelay Qod.1 ee Xeerka Madaxweynaha JDS ee 10ka Jannaayo 1978, Lamb.4, waxaa haddana lagu beddelay sida soo socota:-

1. Qod. 4:
   I) Dayuuradaha yaryar oo culayskoodu aan ka badnayn Kg. 20.000; oo ku soo dega gegida Dayuuradaha, halkii Kg. 1.000 ama jab ka yar (frazione), waxaa looga qaadayaa Sh.So. 40;

   II) Dayuuradaha waaweyn oo culayskoodu ka badan yahay 20.000, oo ku soo dega gegida dayuuradaha, waxaa looga qaadayaa Sh.So. 400, iyo Sh.So. 40 halkii Kg. 1.000 oo dhaafsan Kg. 20.000.

2. Qod. 7:

I) Dayuuradaha oo hakada gegida dayuuradaha muddo ka badan 6 saacadood, waxaa looga qaadayaa ujuuradaha hakashada ee soo socda:

| *Culeyska Dayuuradda* | | *Lacagta Ujuurada laga Qaadayo 24 Saacba* | |
|---|---|---|---|
| 1000 | Kg. | Shs. | 8/= |
| 1500 | » | » | 12/= |
| 2000 | » | » | 16/= |
| 3000 | » | » | 26/= |
| 4000 | » | » | 36/= |
| 5000 | » | » | 40/= |
| 6000 | » | » | 44/= |
| 7000 | » | » | 50/= |
| 8000 | » | » | 56/= |
| 9000 | » | » | 62/= |
| 10000 | » | » | 68/= |
| 11000 | » | » | 74/= |
| 12000 | » | » | 80/= |

II) Halkii 1000 Kg. oo dhaafsan 12.000 Kg. ujuurada hakashada waa Shs. 8/= 24kii saac walba.

3. Qod. 9:

Ujuurada fuulinta dayuuradaha dhoofiyaasha:
a) Dadka waaweyn, qofkiiba Shs. 40;
b) Carruurta Sh. So. 20;

Qod. 2aad

Amar kasta oo horey loo soo saaray, ee ka soo horjeeda amarka lagu soo dejiyey Xeerkaan, waa la baabi'iyey.

Qod. 3aad

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 16 Maajo 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W. MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

WASIIRKA W. G. CIRKA & DHULKA

(Cumar Maxamed Xandulle)

Waan aragnay ee diiwaan gelinay,
Diiwaanka Lamb. 1 bog. lamb. 65,
Muqdisho 4 Luulyo 1981
Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 42 ee 16 Maajo 1981

Wax ka beddelid Tacariifadda Ujuuradaha Nootaayayaasha, ee ku lifaaqan Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 3da Abriil 1972, Lamb. 99.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qad. 82, lamb. 14 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 3dii Abriil 1972, lamb. 99;

ISAGOO AQOOSADAY: In loo baahan yahay in wax laga beddelo tacariifadda ujuuradaha ee Nootaayayaasha;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, iyo talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aanka Golaha Wasiirrada.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

1) Ujuuradaha ku kala xusan qodobbada 2 iyo 4 ee tacariifadda ujuuradaha ku lifaaqan Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 3dii Abriil 1972, lamb. 99, waxaa lagu beddelay sida soo socota:-

1) Qod. 2: Ujuuradaha ku xusan qod. 1 ee koreeya waxaa laga dhigay sida soo socota:-

a) Wakaalad Guud . . . . . Shs. 120,00/=

b) Wakaalad khaas ah . . . . . » 80,00/=

t) Qoraal ku saabsan dhigaal dokumeento . . . . . . . . » 90,00/=

j ) Qoraal ku saabsan dhigaal dardaaran qarsoodi ah (testamento segreto) . . . . . . . . » 150,00/=

x) Qoraal ku saabsan dhigaal dar daaran, markii dardaaranka la dhigayo uu yahay mid uu dardaarmuhu gacantiisa ku qoray (testamento olografo) . . . . . . » 50,00/=

2) Qod. 4: Qoraallada iyo heshiisyada ku saabsan kala wareegidda hanti ma-guurto, qiimaha hantida la heshiisyada Shirkadeed oo cayn kasta ah iyo wada lahaansho hantiyeed, qiimaha hantida lagu shirkoobayo ama la wada yeelanayo;
isku darid, qiimaha guud ee hantida iyo kaydka shirkadaha la isku darayo; haddii shirkadaha la isku darayo middoodii ay midda kale la midoobayso kana noqonayso, hantida iyo kaydka guud ee shirkadda oo midda kale la midoobayso; qoraallada shirarka shirkadaha ku saabsan hanti kordhin ama soo saarid qiraallo deyn shirkadeed (obbligazione), qiimaha hantidii hore lagu soo kordhinayo, ama qiimaha guud ee Qoraallada ku saabsan hanti kala qaybsasho, qiimaha guud ee hantida la qaybsanoyo; qoraallada ku saabsan xuquuq ama hanti is-dhaafin ama isugu beddelid (transazione), qoraallada ku saabsan dhisid xuquuq la xiriira intifaaca, isticmaalidda iyo mididiinnimo dhuleed (servitù prediali), raxan, alaab isku beddelid (permuta); xaraash maxkamadeed, enfiteeusi, iyo qoraallada kale ee ku saabsan xuquuqda ee lahaanshada (diritti possessori) ama dhammaanad, waxaa looga qaadayaa ujuuradaha soo socota:-

a) Qiimo ilaa Shs. 10.000, . . . . . . 6%

b) laga billaabo Shs. 10.001 ilaa Shs. 25.000 3,50%

t ) laga billaabo Shs. 10.000 ilaa Shs. 50.000 3%

j ) Laga billaabo Shs. 50.001 ilaaShs· 100.000, 1,50%

x) » » » 100.000, » » 500.000, 1%

kh) Inta dhaafsan Shs· 500.000 . . . . . 0,30%

2) Dhammaan ujuuradaha ku kala xusan qodobbada kale ee isla tacariifadda horay la soo sheegay, oo aan Xeerkaan wax looga beddelin, sidii hore ayaa loo qaadayaa.

Qod. 2aad

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa markii lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah JDS.

Muqdisho, 16 Maajo 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W. MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

WASIIRKA W. GAR. & AR. DIINTA

(Axmed Shire Maxamuud)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 66
Muqdisho, 4 Luulyo 1981
Hantidhowraha Guud
Dr Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L.43 ee 16 Juunyo 1981,

Magacaabid Gudd/ha Maxkamadda Badbaadada Gobolka W/Galbeed Hargeysa.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 3 soona baxay 10kii Jannaayo 1970, kuna spbsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo beddelaaddii ku dhacday;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Guddoomiye loo magacaabo Maxkamadda Badbaadada Gobolka W/Galbeed Hargeysa, si awooddeeda waxqabad sare loogu qaado la isuguna dheellitiro culayska howlaha ay ka xil saaran tahay.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

G/DHEXE SHARIIF SHEEKHUNA MAYE, oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxaa loo magacaabay inuu noqdo Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Gobolka W/Galbeed Hargeysa;

Qod. 2aad

Guddoomiyuhu wuxuu yeelanayaa gunno dhan Shs.800/= (Siddeed Boqol) waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS;

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Juunyo 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

waan aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaaka lamb. 1 bog. lamb. 141,
Muqdisho 28 Juunyo 1981,
Hantidhowraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L.44 ee 30 Juunyo 1981,

Kordhinta Sigaarka Galayr iyo Tarraqa.

MADAXWEYNAHA JDS

WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA

ISAGOO ARKAY: Go'aanka N.18 ee 30.7.1955 kuna saabsan Monobooliga Sigaarka iyo Tarraqa;

ISAGOO ARKAY: Go'aanka N.4 ee 11-4.63, kuna saabsan awoodda Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, go'aynta qiimaha Sigaarka iyo arraqa.

ISAGOO ARKAY: Go'aan N. 297 ee 28.11.62 kuna Saabsan Awoodda Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda goynta qiimaha Sigaarka iyo Tarraqa.

WUXUU GOOYEY

Qod. 1aad

1) Waxaa qiimihii Sigaarka Galeyr lagu kordhiyey Sh.So. 2, laga bilaabo 30.6.1981, waxaana baakadii lagu gadi doonaa Shs. 10/=.

2) Sidaas oo kale Tarraqa waxaa lagu kordhiyey Shs. 0,25, laga bilaabo isla taariikhdaas, waxaana baakadii lagu gadidoonaa Shs. 1/=.

Qod. 2aad

Go'aankan wuxuu dhaqan gelayaa 30.6.1981, waana in loo gudbiyo Hantidhowrka Guud si uu u diiwaan geliyo.

WASIIRKA W. MAALIYADDA

(Cabdullaahi Axmed Caddow)

Waan aragnay ee Diiwaangelinay;

Diiwaanka lamb 1 bogga lamb. 57;
Muqdisho, 29 Juunyo 1981;

Hantidhowraha Guud;

Dr. Xuseen Cabdule Cali.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L.45, ee 16 Maajo 1981
Kordhin Ujuuru la xiriira Isgaarsiinta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod.82 Lr.14 ee Dastuurka JDS;
ISAGOO ARKAY: Tacariifada Taararka Caalamiga ah, iyo sharciga 22.12.1975 Lr.1 (qodobka 9aad) ee ku saabsan Isgaarsiinta;
ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la kordhiyo ujuuradda taararka, tan cinwaanka taararka, iyo tan khidmadda furidda teleefoonada la xiro;
ISAGOO TIXGELINAAYA: Talada ay isaga u soo kala jeediyeen Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta iyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

1) Ujuuradda taar kasta oo la dirsanaayo, Dalka gudihiisa waa 0,40 Shs. ereygiiba.
2) Ujuuradda cinwaanka taararka waa Shs. 150 sannadkiiba.
3) Ujuuradda khidmadda furidda teleefoonnada la xiray waa Shs. 50/=.

Qod. 2aad

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W. MAALIYADDA
(Cabdullaahi Axmed Caddow)

WASIIRKA W. B. & ISGAARSIINTA
(Maxamed Xawaadle Madar)

Waanaragnay ee Diiwaangelinay;
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 61;
Muqdisho, 4 Luulyo 1981;
Hantidhowraha Guud;
Dr. Xuseen Cabulle Cali.